JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA
Hantidhawrka Guud

Sharci No. 34 ee14/1972

Sharciga Hantidhawrka Guud

Law No.34 of 14/4/1972

Low on The
Magistrate of Accounts

Legge No.34 Del 14/4/1972

Legge Sul
Magistrato Ai Conti

Extracts From official Bulletin

Suppl. No. 2 Al 4 Del 24/4/1972

SHARCI NO. 34 EE 14/04/1972
Sharciga Xafiiska Hantidhawraha Guud ee Qaranka

Qod. 1aad
Hantidhawraha Guud ee Qaranka

Hantidhawraha Guud ee Qaranka waxaa lagu magacaabaa Dekereeto Madaxweyne, si waafaqsan Sharciga iyo Nidaamka, wuxuu sameeyaa hawlaha barista ee la xiriira Maamulka Xisaabaadka Dowladda sida uu qabo Nidaamka iyo Sharciga Maamulka Xisaabaadka u degsan, kan Bakhaarada iyo wixii kale ee uu Sharciga u ogolyahay.

Xafiiska Hantidhawraha Guud wuxuu hoos tagaa Madaxweynaha, wuxuuna leeyahay awood madax bannaan oo Sharciyeysan oo dhamaan Dalka saamaynaya.

Qod. 2aad
Ku xigeennada Hantidhawraha Guud

Ku xigeennada Hanti dhawraha Guud waxaa lagu magacaabaa Dekereeto Madaxweyne, iyadoo laraacayo Nidaamka Sharciga Shaqaalaha waxeyna fuliyaan dhamaan hawlaha uu u xilsaaro Hantidhawraha Guud iyo kuwa kale ee la xiriira Sharciga iyo Nidaamka Xisaabaadka.

Haddii uu ka maqnaado ama laga joojiyo hawlaha Hantidhawraha Guud waxaa sharci ahaan si toos ah u Beddelaayo Ku xigeenka ugu darajo sarreeya uguna waayo aragsan.

Qod. 3aad
Shaqaalaha Xafiiska Hantidhawrka Guud

Waxaa lagu qoran karaa nidaamka u degsan Sharciga Shaqaalaha Dowladda, Xafiiska Hantidhawrka Guud wuxuu hawlahiisa u adeegsan karaa Dad aan ka mid aheeyn Shaqaalahiisa, hase yeeshee dulsaar ku ah oo ka socda Hay'adaha Dowladda ama Ciidamada.

Qod. 4aad
Damaanad Qaaad

Hantidhawraha Guud, Ku xigeenadiisa, dhamaan Shaqaalihiisa iyo kuwa kale ee dul saarka ku ah inta ay ku jiraan fulinta hawlaha sida sharciga ah loogu aaminey, waxey ku shaqeynayaan madax bannaani buuxda oo aan laheeyn wax fara gelin ah, haddii uu san jirin sharci hor istaagaya hawlahooda.

Qod. 5aad
Baarista hore ee Kharashka Dowladda

Hantidhawrka Guud wuxuu saameyaa, Baarista hore ee la xiriirta Dokumeyntiyada ku xusan Lacagaha Dowladda si waafaqsan qaabka iyo xilliga uu qeexayo Sharciga.

Qod. 6aad
Baarista Dambe ee Kharashaadka Dowladda

Hantidhawrka guud wuxuu sameeyaa baarista dambe ee Maamulka Miisaaniyadda caadiga ah iyo tan Horumarita ee Dowladda si loo xaqiijiyo :

B) in dhamaan h antida la kharash gareeyey lagu qabtey hawlihii loogu tala galey Miisaaniyadda iyo in kharash kasta uu waafaqsan yahay ku talagalka Miisaaniyadda.

T) In hantida Qaranka loo kharash gareeyey si waafaqsan Sharciga iyo mabda'a Beeqaameynta Dhaqaalaha.

Qod. 7aad
Ilaalinta iyo Baarista dakhliga Dowladda

Hantidhawrka Guud, wuxuu baaraa isla markaana uu xaqiijiyaa dhaq dhaqaaqyada la xiriira dakhliga Dowladda si loo hubiyo in si habsami ku jirti loo qaadey dakhliga dhabta ah ee la qabtey iyo kan la xareeyey ee Dowladda , in la waaafajiyey qaabka iyo xiliga lagu qeexey sharciga, tusaalooyinka iyo awaamiirta.

Qod 8aad
Baarista Hantida Dowladda

Hantidhawraha Guud wuxuu baaraa, hubiyaa isla markaana xaqiijiyaa dhamaan dhaq dhaqaayada la xiriira Hantida Guurtada iyo Ma guurtada ee Dowladda.

Qod. 9aad

Baarista Maamulka Dowladaha Hoose, Hay'adaha madax banaan & Shirkadaha ay Dowladdu qeyb ku leedahay

Iyadoo ay san jirin wax qoraal ah, ayuu hanti dhawrka Guud wuxuu baarayaa isla markaana uu xaqiijinayaa sida ay u maamulaan Lacagaha iyo hantidaba Maamullada ka jira Dowladaha Hoose, Hay'adaha madax banaan iyo Shirkadaha ay Dowladda qeyb ku leedahay xilli kasta ee uu u arko in ay muhiim tahay si looga soo saaro, qaldaadka ka jira Maamulka Xisaabaadka iyo qaldaadka lagu muteysankaro ciqaab.

Qod. 10aad
Xaqiijinta ku dhaqanka Miisaaniyadda iyo Warbixin sanadeedka Xafiiska Hantidhawrka Guud

Hantidhawrka Guud, wuxuu xaqiijinayaa ku dhaqanka Miisaaniyad Sanadeedka ee uu soo gudbiyey Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda, sida uu farayo qodobka 26aad ee Nidaamka Maamulka Xisaabaabka, ugu dambeyn 31ka Bisha Maajo ee Sanad walba, Hantidhawrka Guud waa inuu diyaariyo warbixin faahfaahsan ee laxiriirta natiijada lagala kulmey isticmaalkii Miiisaaniyadda si loogu gudbiyo Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda nuqul kamid ah warbixintaas oo ku lifaaqan isticmaal Sanadeedkaas..

Haddii Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda uu u soo gudbin waayo warbixinta xilliga iyo qaabka ku qoran qodobka 27aad ee Nidaamka Maamulka Xisaabaadka, wuxuu Hantidhawrka Guud u gudbinayaa sida ugu dhaqsiyaha badan Madaxweryanaha Jamhuuriyadda.

Qod. 11aad
Warbixin

Xilli kasta, wuxuu Hantidhawraha Guud u gudbin karaa Madaxweynaha warbixin la xiriirta hawlihiisa Shaqo.

Qod. 12aad
Baarista Xisaab Celinta

Hantidhawrka Guud, wuxuu baarayaa xisaabaadka ee uu soo gudbiyo Xisaabyaha Guud, taasoo ay la socoto qoraal muujinayo aragtidiisa, hase yeeshee Hantidhawruhu haddii uu arko in ay sax tahay isla markaana uu ku qanco wuu ansixinayaa, haddiise baarista lagala kulmo khaldaad wuxuu adeegsanaayaa Shaqaalihiisa si ay u soo hubiyaan cidda mas'uulka ka ah Maamulkaas, iyadoo xaqiijinta arintaana loo maraayo si sharci ah Maxkamadda Sare oo hubineysa Mas'uuliyadda khaladka Qofka iska leh.

Qod. 13aad
Warbixinta khaladaadka lagala kulmo Xisaabaadka

Haddii ay jiraan sababo muujinayo khasaaro ama khaldaad dhinaca Kharashka, uruurinta daqliga xanaaneynta, bixinta jeegagga, gadidda, isu gudbinta ama xil wareejinta waraaqaha qiimeysan, Lacagta caddaanka ah, Bakhaarada ama wixii kale ay Dowladdu leedahaya xiriirna la leh Maamulka, waa in Hantidhawraha Guud sida ugu dhaqssiyaha badan ula xiriiraa Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda si uu talaabo ku haboon uga qaado haddii talaabada ku haboon ee loo baahan yahay ka qaadi waayo Wasiirka, wuxuu Hantidhawraha warbixin u gudbonayaa Madaxweyanaha sida uu qabo Qod. 11aad ee Sharciga.

Qod. 14aad
Hawlaha Tala Bixinta

Markasto oo loogu yeerto inuu hawl ka tala bixiyo, ama ay isagaba ka timaado Hanidhawraha talo soo jeedinta, waa in uu bixiyaa Caddeymo ku haboon oo muujinaaya faahfaahinta arimaha la xiriira hawlihiisa.

Qod. 15aad
Dacwooyinka Dembiyada

Haddii hawlaha baarista ay ka soo ifbaxdo arin muujineysa Dembi dhinaca Maamulka Lacagta ama Hantida Dowladda ee Hay'adaha Madax banaan, Maamulada Dowladaha Hoose, Shirkadaha ay Dowladdu qeyb ku leedahay waa in Hantidhawrka Guud si deg deg

ah u sameeyaa Gal Dacwadeed una gudbiyaa Xeer ilaaliyaha Dowladda ee Awoodda u leh.

Xeer ilaaliyaha Dowladda marka uu helo Gal Dacwadeedka oo u soo gudbiyey Hantidhawraha Guud ama cid Wakiil ka ah Xafiiska Hantidhawrka Guud, waa in uu bilaabaa Xeer ilaaliyuhu hawlihiisa si waafaqsan Nidaamka Xeerka ciqaabta Qodobada 69, 70 & 71.

Qod. 16
Dambiyada aan la keydin Karin

Iyadoo laraacayo dib u sixidda lagu sameeyey xarafka B/2 ee Qodobada 70 & 72 ee Nidaamka Xeerka Ciqaabta in aan la keydin karin Dembiyada la xiriira Lacagaha Dowladda iyo Hantida kale nooc kasta oo ay tahay ayna leeyihiin Hay'adaha ku xusan Qod. 15aad ee Sharcigan Baragaraafkiisa 1aad.

Kadib markii uu baaro Xeer ilaaliyaha Dowladda warbixinta, islamarkaana uu u arko in wxyaabihii loo soo gudbiyey aysan ku filneyn in ay muujiyaan dembiga lagaley iyo in uu san aheyn eedeysanaha Qofka falka sameeyey wuxuu dib ugu celinayaa Gal Dacwadeedka Xafiiska Hantidhawrka Guud iyadoo ay la socdaan qoraal sababeysan oo ay ka muuqdaan waxa ka maqan marag muujinta iyo wixii kale oo gaar ah oo sababaya inuu san bilaabin Xeer ilaaliyaha ficilka ciqaabta.

Qod. 17aad
Awoodda Hantidhawrka Guud

Hantidhawraha Guud, ama cidda mataleysa inta ay ku jiraan hawlahooda waxey fulinayaan Awoodaha Hoos ku qoran iyadoo aan la soo marin Nidaamka:.

1. Hantidhawraha wuxuu Awood u leeyahay in uu baaro hawl kasto ee ay dowladu leedahay ama gaar ahaaneed oo raad ku yeesha Maamul Hanti Dowladeed, wuxuuna baari karaa dhamaan Diiwaanada, Buugaagta Lacag qabashada, Dokumintiga Lacagaha cadaanka ah, Tikidhada, Bakhaarada iyo wixii kale ee la xiriira Hantida Dowladda iyo tan gaarka ah.

B) Wuxuu Awood u leeyahay in uu qof kastaba ugu yeeran karo Xafiiskiisa ama gooba kale, si uu wax ugu weydiiyo arimaha la xiriira hawlaha Xafiiska Hantidhawrka

T) Hantidhawrka Guud wuxuu baaris ahaan u qaadan karaa wax alla wixii Dokuminta Xisaabeed ee ku lug leh Hantida Dowladda oo si aan Sharci aheyn loo Maamuley.

2. Qof kasta waa ku waajib in uu gacan ku siiyo Hanidhawraha Guud gudashada waajibaadkiisa Shaqo
3. Haddii loo baahdo inta uu ku jiro Hantidhawraha gudashada waajibaadkiisa wuxuu u yeeran karaa Ciidamada Booliska.

Qod. 18aad
Sharciga

In lafuliyo Sharcigan waxaa lagu soo saarey Dekereto Madaxweyne.

Qod. 19aad
Baabi in

Sharci kasta ama amarrada ka soo horjeeda Sharcigan isla markaana aan la shaqeyn Karin Waa la baabi'iyay.

Qod. 20 aad
Dhaqan Gal

Sharcigan waa in sida ugu dhaqsiyaha badan loo dhaqan geliyo, isla markaana lagu Daro uruurinta rasmiga ee Sharciga laguna faafiyo, faafinta rasmiga ah.

C'idkasta, waxaa qasab ku ah in ay ilaaliso, kuna ilaaliso Sharciga u degsan Dowladda.